EDMONTON PUBLIC SCHOOLS

BOARD OF TRUSTEES
WARD A Sherri O'Keefe
WARD B Marsha Nelson
WARD C Marcia Hole
WARD D Trisha Estabrooks
WARD E Dawn Hancock
WARD F Julie Kusiek
WARD G Saadiq Sumar
WARD H Nathan Ip
WARD I Jan Sawyer

SUPERINTENDENT OF SCHOOLS
Darrel Robertson

Centre for Education
1 Kingsway NW
Edmonton AB T5H 4G9
T 780-429-8000
F 780-429-8318
E info@epsb.ca

October 24, 2022

Gacaliye waalidka, masuulada iyo qoysaska,

Dayrtan, Dugsiyada Dadwaynaha Edmonton waxay shaqada bilaabaysaa si qaab wanaagsan loogu fahmo kala duwanaanshaha ardayda aanu u adeegno. Macluumaadkan waxa uu caawin doonaa ku wargelintra falalkayaga si looga dhigo dugsiga mid soo dhawayn leh iyo meel badbaado u ah dhammaan ardayda. Todobaadyada soo socda ardayda Fasalka 4 ilaa 12 waxay haysan doonaan fursada **xog ururinta ku saabsan ardayga.**

Ardayda ka qayb gelaysaa waxay dhammaystiri doontaa xog ururinta muddada wakhtiga fasalka iyadoo laga fekerayo gaar ahaanshahooda, iyo shaqaalaha dugsiguna waxaa loo heli doonaa si uu u taageero ardayda sida loo baahdo. Dhammaan su'aalaha xog ururintu khasab maaha, taas oo macnaheedu yahay ilmahaagu keliya waxa uu ka jawaabi doonaa su'aalaha ay raaxo ka dareemaan ka jawaabida.

**Waa maxay Macluumaadka Xog Ururinta Kusaabsan?**
Dayrtii 2021 Dugsiyada Dadwaynaha Edmonton waxay shaaciyeen Anti-racism and Equity Action Plan (Qorshaha Ku lidka ah Isir nacaybka iyo Tallaabada Sinaanta) si wax looga qabto isir nacaybka Qaybta oo loo qaado tallaabooyinka dhanka sinaanta ah. Qorshahan waxaa lagu dhisay saddex aag oo muhiim ah. Aagagan waxaa la sameeyay ka dib dhegaysiga waayo aragnimada ay soo mareen aradu ardayda, shaqaalaha, qoysaska tallooyinka ee 2020–2021 Guddida La talinta Sinaanta. Mid ka mid ah saddexda aaga ee ugu muhiimsan ee lagu aqoonsaday qorsahaha waa in la barto wax ku saabsan ardyada iyaddoo laga ururinayo macluumaadka xogta dheeraadka ah si loogu wargeliyo tallaabooyinka keeni doona isbeddel wanaagsan.

Dhexda xogta, ardayda waxaa lagu marti qaadi doonaa inay wadaagaan macluumaadka ku saabsan:

- Aqoonsigooda asalka wadanka ah
- aqoonsiga isirka
- qoomiyada
- diinta ama ku xidhnaanta ruuxiga ah
- aqoonsiga sinjiga
- qaabka galmada *(Fasalka 7–12 keliya)*

**Sababtee Qaybtu u waydiinaysaa macluumaadkan?**
Xogta ka timid macluumaadka xog ururinta ardaygu waxay naga caawin doontaa inaan si wanaagsan u fahamno kala duwanaanshaha ardayda. Xogta waxaa lala faaqidi doonaa xogta kale ee hadda ka hor laga heli karo Qaybta. Macluumaadkan waxauu ka caawin doonaa Dugsiyada Dadwaynaha Edmonton inay si wanaagsan u fahmaan sida kooxaha kala duwan ee ardaydu waayo aragnimo uga helaan dugsiga oo ay ku wargeliyaan tallaabooyinka la qaadi karo si loo taageero guusha ardayga.

Muuqaalka guud ee natiiojooyinka hore iyo qaababka ka yimid xog ururinta macluumaadka qofka ku saabsan waxaa lala wadaagi doonaa bulshadda. Macluumaadkan ma aqoonsan doono dugsiga gaar ah ama ardayda.

**Gaar ahaanshaha iyo amniga macluumaadka ilmahaaga**
Macluumaadka ardayga waa xasaasi oo waa qarsoodi. Sidii kormeeraha wanaagsan ee macluumaadka Dugsiyada Dadwaynaha Edmonton waxa uu raacaa *Freedom of Information and Protection of Privacy Act* (FOIP), (Xoriyada Macluumaadka iyo Ilaalinta Xeerka Gaar ahaanshaha) iyo dhaqamada wamaagsan si loo urursho, loo kaydiyo oo loo ilaaliyo macluumaadka ardayga iyo xogta.

**Kumaa arki doona jawaabaha ardayga?**
Jawaabaha gaarka ah si rasmi ah waxaa loogu kaydin doonaa serfarka dhexe oo waxaa keli soo geli kara tiro yar oo shaqaalaha Qaybta ah kuwaas oo ka masuul ah maamulka xogta iyo xil qarinta. Macluumaadka ardaydu wadaagto waxa uu ahaan doonaa qarsoodi, taas oo macnaheedu yahay lalama wadaagi doono shaqaalaha dugsiga, qoysaska ama dad waynaha gebi ahaan.

**Walaacyada waalidka ama su'aalaha**
Waalidka aan doonayn ilamahoodu inuu ka qayb galo xog ururinta waa inay tan kala xidhiidhaan dugsiga ilmahooda. Tan waxaa lagu samayn karaa wicitaanka telefoonka, wada sheekaysiga qof ahaaneed ama qoraal ahaan.

**Rajadayada mustaqbalka**
Dugsiyada Dad waynaha Edmonton waxay ku balan qaadayaan ku lid ahaanta isir nacaybka iyo sinaanta. Fursada lagu ogaado wax badan oo ku saabsan aqoonsiga ardaygu waa hal tallaabo oo ugu wanaagsan dhanka isbeddelka macnaha buuxa leh. Rajadayada waa in dhexda xog ururintan aanu ku baran doono wax ku saabsan tallaabooyinka keeni karo mustaqbalka halka dhammaan ardaydu ay dareemaan dareenka lahaanshaha oo ay la kulmaan guul.

Kii daacada kuu ahaa

Darrel Robertson
Kormeeraha Guud ee Dugsiyada

*Macluumaadka gaarka waxaa lagu ururiyaa si waafaqsan Qaybta 33(c) ee Freedom of Information and Protection of Privacy Act (FOIP), (Xoriyada Macluumaadka iyo Ilaalinta Xeerka Gaar ahaanshaha) iyo Xeerka Waxbarashadda si loo taageero soo dhawaynta, daryeelka, badbaadada iyo deegaanka tixgelinta u leh ardayda, shaqaalaha iyo dad waynaha guud. Su'aalo kasta oo la xidhiidha FOIP waxaa lagu soo hagaajinayaa Brenda Hoang, Division FOIP Office, Technology and Information Management, The Centre for Education, One Kingsway Avenue, Edmonton, Alberta, Kanada. Telefoonka: +1 780-429-8350.*

*Macluumaadka gaarka waxaa lagu ururiyaa si waafaqsan Qaybta 33(c) ee Freedom of Information and Protection of Privacy Act (FOIP), (Xoriyada Macluumaadka iyo Ilaalinta Xeerka Gaar ahaanshaha) iyo Xeerka Waxbarashadda si loo taageero soo dhawaynta, daryeelka, badbaadada iyo deegaanka tixgelinta u leh ardayda, shaqaalaha iyo dad waynaha guud. Su'aalo kasta oo la xidhiidha FOIP waxaa lagu soo hagaajinayaa Brenda Hoang, Division FOIP Office, Technology and Information Management, The Centre for Education, One Kingsway Avenue, Edmonton, Alberta, Kanada. Telefoonka: +1 780-429-8350.*